




PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

WAA MAXAY WAXA LOO COD-QAADAYAA 5-TA NOFEEMBAR 2019?

Portland Public Schools waxay qabanaysaa codbixin si codbixin loogu qaado dib-u-cusboonaysiinta canshuurta (levy) hadda maalgaliso shaqooyinka macalimiinta ee dhammaan degmada. Ku dhawaad saddex meeloodkiiba meel mushaarka macalimiinta Portland Public Schools ayaa lacaga bixiyaa canshuurta hadda la qaado.



Haddii la cusbooneysiyo, cashuurta waxaa lagu qiyaasaa inay soosaari doonto \$99.9 milyan oo loogu talagalay Portland Public Schools sanad dugsiyeedka 2020-2021.

Haddii la oggolaado, cashuurta ayaa bixin doonta mushaarka waxbaridda iyo taageerada fasalka ee dugsi kasta oo degmada ku yaal. Shantii sano ee la soo dhaafay, canshuurta waxay bixisay celcelis ahaan 825 mushaarka baridda sannad kasta. Haddii la oggolaado, celceliskaas waxaa lagu qiyaasaa uu sii jiro. Macalimiintan waxay:

- U dhigmi doonaan saddex meelood meel dhammaan jagooyinka macalinnimo ee Portland Public Schools.
- Bari doonaan fasalada muhiimka ah, iyo sidoo kale kobcinta fasalada dugsiiga hoose iyo kan dhexe iyo xulashooyinka xiisaha kaladuwan iyo taqasusyada ardayda dugsiiga sare.
- Bari doonaan barnaamijyada xirfadaha iyo farsamada iyo barnaamijyada STEM, oo ay ku jiraan barashada sayniska kombiyuutarka, iyo xirfadaha u diyaarsanaanta kuleejka iyo xirfadaha.
- Ardayda siin doonaan taageero waxbarasho oo khaas ah ee maadooyinka ay ka midka yihiin akhriska iyo xisaabta.

Haddii cashuurta la ansixiyo, waxaa sii socon doona kormeerka maaliyadeed iyo kormeer madax-bannaan

- Cusboonaysiintaani waxay sii wadi doontaa heerka canshuurta ee ikhtiyaariga ah ee hadda jira oo ah \$1.99 halkii \$1,000 ee la qiimeeyay waxayna bixin doontaa lacagaha lagu hagi doono taageera iskuullada.
- Haddii la ansixiyo, ikhtiyaarkan maxalliga ahi wuxuu u baahan doonaa kormeer madax-bannaan ee muwaadiniinta ah si lacagaha cashuurta loogu isticmaalo ujeedooyinka ay ansixiyeen cod-bixiyayaasha maxalliga ah kaliya.
- Lacagaha waxaa la gelin doonaa koonto-hoosaad si loo fududeeyo kormeerka iyo warbixinta saxda ah.
- Ma jireyso wax lacag ah oo ka imanaysa ikhtiyaarkan canshuureed ee loo adeegsan doono maamulka degmada.

Nếu được thông qua, loại thuế này sẽ duy trì mức Haddii la ansixiyo, canshuurtan ayaa joogteyn doonta sicidhka canshuurta ee hadda jira oo ah \$1.99 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Guriga leh qiime celcelis ahaan lagu qiimeeyay \$ 233,925, qiimaha wuxuu noqonayaa ugu yaraan \$ 39 bishii, ama \$ 465 sanadkii.

Muxuu noqonayaa qarashka ku kacayo canshuur bixiyayaasha haddii canshuurtan degaanku ay ansixiyaan cod-bixiyayaasha?

Canshuurta la soo jeediyay ma noqon doonto canshuur cusub. Waxay noqonaysaa cusboonaysiinta cashuurta hadda jirta, oo ay markii ugu horreeysay ansixiyeen cod-bixiyayaasha 2011 dibna loo cusboonaysiiyay 2014. Waqtiga xaadirkan, milkiileyaasha guryaha waxay cashuur ahaan u bixiyaan \$1.99 halkii \$1,000 ee qiimaha guriga lagu qiimeeyay. Haddii ay ansixiyaan cod-bixiyayaasha, milkiileyaasha guryuhu waxay sii wadi doonaan inay bixiyaan isla heerkaan shan sano oo dheeraad ah.

Maxaa dhici doona haddii cashuurta ikhtiyaariga maxalliga ah ayan ansixin cod-bixiyayaasha?

Haddii cashuurta aan la ansixinin 2019, Portland Public Schools ma heli doonaan qiyaasta \$ 99.9 milyan dakhliga canshuurta sanad dugsiyeedka 2020-21, taas oo sababi karta luminta illaa 825 shaqooyinka macalimiinta.

Maxaa cashuurtan loogu gudbiyay cod bixiyayaasha?

Degmo dugsiyeedkan waxaa lagu maalgaliyaa lacagta gobolka, dawladda hoose iyo dawladda federaalka(dhexe). In kasta oo Sharci dejinta Oregon uu kordhiyay maalgalinta loogu talagalay degmooyinka iskuulada, wali waxaa jira farqi u dhexeeya lacagta gobolka ee loogu talagalay waxbarashada K-12 iyo qarashka ay soo ay u baahanyihiin iskuulada degmada. Haddii ay ansixiyaan cod-bixiyayaasha, cashuurtan la soo jeediyay ayaa buuxin doonta lacagta ka dhiman miisaaniyadda.